


Covid-19 iyo Uurka



Haddii aad uur leedahay, waxaa laga yaabaa inaad halis weyn ugu jirto xanuun daran oo Covid-19 ah. Waa kuwan qaar ka mid ah tallooyin aad ku ilaalin karto caafimaadkaaga oo aad iskaga ilaalin karto qaadista Covid-19 inta aad uurka leedahay:



Kala hadal dhakhtarkaaga arrimaha ku saabsan sida aad u ilaalin karto caafimaadkaaga oo aad naftaada u daryeeli laheed inta aad uurka leedahay. Haddii aadan haysan dhakhtar, wac xaruntaada caafimaadka bulshada ama waaxda caafimaadka.



Iska ilaali inta suurtagalnimada ah inaad ag joogtid dadka. Markaad waqti la qaadanayso dadka kale, ka fogow ilaa 6 talaabo oo xidho daboolka wejiga.



Wac 911 haddii aad qabto:

- Dhibaato dhanka neefsashada ah (wax ka badan inta caadiga ahayd markaad uurka leedahay)
- Xanuun joogto ah ama cadaadis kaa saaran laabta
- Wareer degdega ah
- Inaadan awoodin inaad u jawaabto dadka kale
- Bishimaha ama wajiga oo buluug ku noqda



Aad dhammaan ballamahaaga daryeelka uurka ee gaarka ah.



Hubi inaad haysato ugu yaraan daawooyin aad isticmaali karto muddo 30-maalmood ah.

